Waa muhiim firaaqada ama haysashada ay caruurtaadu ay haystaan wakhtiyo firaaqo ah oo markaas ay qabsankarayaan, kuna mashquuli karaan wax yaalo gaar ah oo ay xiiseynayaan.

WARBIXIN KU SAABSAN XANAANAANEYNTA IYO HAYNTA CARUURTA MARKA ISKUULADU AY XIDHANYIHIIN

Skolverket
Swedish National Agency for Education

PAULINE ST-DENIS/FANCY

Caruurtaada ayaa loogu talagalay in lagu hayo, inta uu iskuul ka uu xidhanyahay.

Waalidka isga ayaa caruutiisa uga dhaw qofkasta ama cidkasta, sidaas daraadeed waxaa muhiim ah in waalidiintu ay xidhiidh wanaagsan oo joogta ah la lahaadaan shaqaalaha ka shaqeeya qeyba has anuu soo sheegnay, iyo qofka u xilsaaran ee masuulka ka ah. Taas oo ay kala hadli karaan waxkasta oo ku saabsan, tusaale ahaan sida,wax qabdyada kala duwan ee ay caruurtu meesha ku sameeyaan, iyo haddii ay ka qabaan wax su´aalo ah ama cudurdaaro ku saabsan tirada caruurta meesha laysugu geeyey.

Sidaas awgeed haddii shaqaaluhu iyo qofka u xilsaaran ee masuulka ah ogsoonyahay waxa aad jeceshahay ama aad la jeceshahay ilma haaga. Waxaa markaa aad u fudu daanaysaa sidii ilmahaaga loogacaawimi lahaa waxa uu doonayo ama uu damacsanyahaba.

Si hadaba aad ula socotid, fikradahaagana aad ku kordhisid, waxaa lagamamaarmaan ah in aad wax ka ogaatid sida uu u shaqeeyo “fritidshemmet” ka ama meela ha lagu hayo caruurta marka uu iskuulku uunan furneeyn, ama uu xidhan yahay.

Maxaa hogaanka u haya ama xukuma “fritidshem” ka ama meesha lagu hayo caruurta marka uu iskuulku uunan furneeyn, ama uu xidhan yahay?

“Fritidshem” ama meesha lagu hayo caruurta marka uu iskuulku uunan furneeyn, ama uu xidhan yahay waxay raacaan kuna dhaqmaan sharciyada u degsen waxbarashada iskuulada. Sharciyadaas oo kamid noqonkara sida in tiro caruur ah sugantahay. Isla markaana da ahooduna uu aad u kalaweyneyn, islamarkaana meelaha loogutalagalay inlgu hayo caruurta ay ahaadaan meelo ku haboon, iyadoo markaasna si gaar ahaaneed loo eegayo ama la tixraacayo baahiyada kala duwan ee caruurtu leeyihiin.

Waxaa intaas soo raaca in shaqaala meesha ka shaqeeya ay leeyihin xirfadaha shaqooyinkaas loogutalagalay, iyo in ay khibrado leeyihiin, si markaa ay u xanaaneeyan isla markaana wax u baraan caruurta. Iyagoo eegayana markaana tixraacayana baahiyadooda kala duwan.

“Fritidshem” ama meesha lagu hayo caruurta marka uu iskuulku uunan furneeyn, ama uu xidhan yahay. Waxay raacaan qorsho dugsiyeedka loo gutalagalay dugsiyada. Qorshahaas oo ay soo qorsheeyeen siyaasiyiinta dawlada. Qorshahaas oo lamidah sida qorshayaasha kale ee waxbarashadeed, ee u degsen sida tusaale ahaan dugsiyada xanaanada caruurta, islamarkaana ah waajib.

Qorshayaashasi waxaa ay noqonkaraan, sida waxbarashadu ay ulahaankarto hadaf waxbarasho oo wanaagsan mustaqbalka, iyo barashada kaladanbeeynta iyo qiimeenta bulshada.

Haddii aad akhrisatid qorshaha u yaala wax barashada dugsiyada, waxaad markaa aad ogaan karaysaa waxbarashada aad u baahantahay in uu ilmahaagu hadafkeeda uu yeesho, iyo waxyaalaha kale ee aad dooneysid in lagacaawiyo.

Iswiidhen degmooyinka ayaa ka masuul ah sidii ay caruurtu ku heli lahaayeen “fritidshem” ama meesha lagu hayo caruurta marka ay iskuuladu aynan furneeyn, ama uu xidhan yahay.kuwaas oo ah, laga bilaabo da´da ilaa iyo 12jiro. Laakinse caruurta da´doodu u dhaxayso 10jir–12jir, waxa ay tegi karaan meelo gaar ah “fritidsverksamhet” ama meesha lagu hayo caruurta marka uu iskuulku uunan furneeyn, ama uu xidhanyahay, ku waas oo u baahnayn caruurta in ay ka diiwaan gashanaadaan. Caruurta qasab kuma ah in ay tagaan, laakinse waa haddii ay doonayaan in ay tagaan wey u banaantahay, weeyna tegikaraan. Waana fursado loogu talagalay caruuraha dadaas aanu soo sheegnay jira.

Masuuliyada wax ay saarantahay sida tusaala ahaan (Degmooyinka, ama haddii ay leeyihiin dad ama shirkado gaar ah oo madax banan) kuwaas ayaana qorsheya, dejiyana qorshaha uu ku shaqeynayo “Fritidshem” ama meelaha lagu hayo caruurta marka uu iskuulku uunan furneeyn, ama uu xidhan yahay. Isla markaana dabgal ku sameeya, warbixnona ka bixiya. Dabagladaas iyo warbixinadaasna waxaa ku shaqaleh shaqaalaha ka shaqeeya meelahaas aanu soo sheegnay.

Laxidhiidh weydiina “Fritidshem” ama meelaha lagu hayo caruurta marka uu iskuulku uunan furneeyn, ama uu xidhan yahay. Wixii gacan ah ee aad adiga iyo ilmahaagaba aad ka geysan kartiin.

SUSANNE KRONHOLM/ETSA

MASKOT/MARTIN BOTVIDSSON

Waa in ay tahay mid micno iyo qiimo badan leh cayaaraha fudud eek ala duwan ee ay caruurtu sameeyaan wakhtiyada firaaqada ay yihiin. Isla markaana u noqota mid ka caawisa caruurta koritaankooda maskaxeed.

Sida uu sharciga dugsiyada uu dhigayo “Fritidshem” ama meesha lagu hayo caruurta marka uu iskuulku uunan furneeyn, ama uu xidhanyahay, waa in ay helaan caruurta cayaarsiin macno aad u qiimo badan leh, aqoontooda waxbarashona kor uqaada. Si markaa ay u hirgasho, waxaa muhiim ah, lagama maarmaana aas-aas u ah in ay ahaato meesha caruurtu ay isgu imaanayaan mid deegaankeedu guud uu fiicanyahay, xiisobadana ku abuurta caruurta,laguna talagalay in lagu cayaaro,waxna ay caruurtu ku soobandhigi karaan, dhaq-dhaqaa jimicsi ahna lagu sameenkaro. Waxaa kaloo intaas soo raaca in ay meeshu ay ahaato mid baaxadeedu sugantahay. Waxa qabadyadaasna waxaa laga tixracayaa hadba dada caruurtu inta ay jiraan, iyo dabeecadahooda iyo deganaashahooda,baahidooda,waxa ay xiiseeynayaan, iyo khibradaha ay leeyihiin.

Wax qabadyadu waxa ay had iyo jeer ay ku xidhantahay, hadba caruurta meesha isugu timaada.

“Fritid” ka ama dhaq-dhaqaayada kaladuwan ee ay sameeyaan caruutu marka ay wakhti haystaan.waxa ay waxtar weeyn ay u leedahay aqoontooda waxbarashadeed. Sababtoo ah caruurtu maalinti oo dhan siyaabo ama hababkalduwan ayey wax u bartaan. Taas oo tusaalo ahaan caruurtu ay noqon karaan caruur fur-furan oo dadka dhexgala,isku filnaasho iyo kalsooni buuxda lahaada,ixtiraam balaadhan iyo qadarin weeyn siiya bulsho weynta iyo iyagoo ixtiraama fikradaha kaladuwan ee ay dadku yeelankaraan, iyo in wixii fikrado kala duwan oo ay dadka qabaan in ay heshiis kulla noqdaan

Waa waxbarasho kale oo dheeraad ah, oo la shaqeeysa Iskuulada.

Waxaa ka dhaxeeya wadashaqeeyn balaadhan shaqaalaha ka shaqeeya iskuulada iyo "Fritidshem" ka ama meelaha lagu hayo caruurta marka uu iskuulku uunan furneeyn, ama uu xidhan yahay. Sidaas daraadeed ayuu ilmaahaagu maalintii oo dhan uu u heli karaa aqoon aad u sareysa, iyo horumar aqoomeed oo aad u sareeysa.

"Fritidshem" ama meelaha lagu hayo caruurta marka uu iskuulku uunan furneeyn, ama uu xidhan yahay. Waxa uu lamid yahay sida waxbarashada iskuulada ama dugsiyada caadiga ah ee ay caruurtu dhigtaan. Wax qabadyaduna waa mid ku saleeysan kuna dhisan dhiirigalin waxbarasho oo lagu abuuro caruurta, iyo in ay noqoto mid xiiso aad u balaadhan leh. Si markaas caruurtu ay niyad waxbarasho ay ugu hayaan wixii waxqabadyo kaladu wan ah.

"Fritidshem" ama meelaha lagu hayo caruurta marka uu iskuulku uunan furneeyn, ama uu xidhan yahay, waxa uu wax katarikaraa kana caawinkaraa iskuulada caadiga ah labasiyaabood ama laba hab oo kala duwan.

Laxiriiritaan wakhtiyo kala duwan. Waxaa laqaabilikaraa caruurta wakhtiyada uu iskuulku uu xidhanyahay, ama wakhtiyada fasaxyada ah ee ay iskuuladu xidhanyihiin. Taas oo fursad weeyn u leh waalidiinta shaqeeya ama waxbaranaya in ay helaan meel ay caruurtooda ay geystaan si caruurta looga sii hayo. Kadibna ay waalidiintu shaqooyinkooda ama waxbarashadooda tegikaraan. Ama danahooda kale ay fushan karaan.

Hadafyada waxa ay ka koobanyihiin sida tusaale ahaan: In ay helidoonaan khibrado dheeraad ah oo aynan ka heli karin iskuulada caadiga ah iyo aqoon dheeraad ah oo aad u sareysa.

CORBIS

Aad ayey muhiim u tahay in uu ilmahaagu uu ka muuqdo caruurta kale, iyo islamarkaana lasocodo.

Ilmahaaga xaq ayuu leyahay in uu ka hadlo ama ka dhiibto wixii fikrada ah ee uu jecelyahay in uu kahadlo. Taas oo macnaheedu uu yahay in caruurtu ay ka hadli karaan wixii ku aadan aragtiyada kusaabsan kulanada iskuulka laguqabto sida ay u arkaan iyo wixii warbixino kale ee kusaabsan waxqabadyada kaladuwan. Waxa ay caruurtuna halkaas ay kaga faa ideysan doonaan kana barandoonaan habka dimuqraadiyadu ay ushaqeyso.

Waa muhiim in uu ilmuhu uu ka qeybqaataan kulanada kaladuwan,sida tusaale ahaan marka qorsho waxbarasho laga hadlayo.

Haddii aad qabtid wax su aalo ah Waxaad la xidhiidhi kareysaa ama aad weydiinkartaa shaqaalaha ka shaqeeya meelahaas aanu soo maga caabnay.

Isku day sidii aad ilmahaaga aad u dhiirigelin laheyd sidii uu usheegto ama uu uga hadlo aragtiyadiisa kaladuwan ee uu jecelyahay in uu ka hadlo.

MATTON

Waxaad ka geysan kartaa gacan buuxda.

Wadashaqeeyn ka dhaxeysa waalidiinta iyo shaqaalaha, waxa ay waxtar balaadhan u yeelan kartaa caruurtaada. Islamarkaana waxa uu ilmahaaga uu lahaandoonaa isku kalsooni buuxda oo laxidhiidha "Fritidshem" ama meelaha lagu hayo caruurta marka uu iskuulku uunan furneeyn, ama uu xidhan yahay.

Sida sharciga wax barashada dugsiyada uu dhigayo, oo ah in iskuulku iyo "Fritidshem" ama meelaha lagu hayo caruurta marka uu iskuulku uunan furneeyn, ama uu xidhan yahay, ay wadashaqeeyn la sameeyaan waalidiinta. Sidaasna horumar wax ku ool ah ay ku fulinkaraan, horumar xaga aqoonta caruurtana ku gaadhikaraan.

Waxaanad la hadli karaysaa shaqaalaha meesha kashaqeeya, wakhtiyda marka aad caruurta aad keenaysid maalintii ama aad caruurta soo doonaysid in aad gaxeysatid. Ama mararaka ama maalmaha aad balamaha gaarka ah aad la leedahay macalimiinta ee lagaala hadlayo ilmahaaga wax barashadiisa heerka uu taaganyahay ama wakhtiyada kale ee shirarka gaarka ah laqabto.

Haddii aad qabtid wax yaalo cudurdaar ah oo kusaabsan waxbarashada ama habka meeshu ay ku shaqeyso waxaad markaa aad kala hadlikartaa degmada aad degentaha, ama gudiga u xilsaaran wixii su aalo ah ee ay waalidiintu qabaan.

ROY MCMAHON/CORBIS

Madoonaysaa inaad waxka ogaatid intaas inkabadan, oo ku saabsan ”Fritidshem” ama meelaha lagu hayo caruurta marka uu iskuulku uunan furneeyn, ama uu xidhan yahay heerarkiisa kaladuwan.

Waxaad hadaba ka helikartaa, kana akhrisankartaawarbixinada kaladuwan ee laga qoray iyo talooyinka kaladuwan ee laga bixiyey ”Fritidshem” ama meelaha lagu hayo caruurta marka uu iskuulku uunan furneeyn, ama uu xidhan yahay heerarkiisa kaladuwan.

Haddii kale oo aad doonaysid waxaad dalbankartaa qoraalo faah-faahineed. Waxaanad la xidhiidhi kareysaa Fritzes kundservice, ama waxaad kala soo bixi kareysaa boga internetka ee ah www.skolverket.se.

Sawiraada waxaa qaaday : kenneth hellman /Etsa
Waxaa isdubaridka hagaajinta leh.; AB Typoform

Skolverket

www.skolverket.se